

Waterbury Xarunta Kasoo-Kabashada Musiibada oo Xidhmi doonta Oktoobar 12

Release Date: Oktoobar 11, 2024

Iyadoo ay isku duwayaan gobolka iyo la-hawlgalayaasha maxaliga ah, waxaanu si rasmi ah u xidhi doonaa Xarunta Kasoo-kabashada Musiibada (DRC) ee Island Pond saacadu marka ay tahay 6 p.m. ee Sabtida, Oktoobar 12, 2024

Xaruntan ayaa haatan la furaa 9 a.m ilaa 6 p.m. Isniin ilaa Sabti oo ku taala:

- Waterbury Armory - 294 Armory Drive, Waterbury, VT 05676

Ka badalaad ahaan, dadka reer Vermont ayaa booqan kara laba kale oo DRC ah oo hadeer la furo 9 a.m. ilaa 6 p.m. Isniin ilaa Sabtida oo ku taala:

- Lyndonville Public Safety Facility - 316 Main Street, Lyndon, VT 05851
- Hinesburg Town Hall - 10632 Route 116, Hinesburg, VT 05461

Xidhitaanka xarumahan ku meel gaadhka ah waxa wada agaasimay gobolka iyo la-hawlgalayaasha deegaanka iyadoo guud ahaan lagu saleeyay xadiga soo-booqdayaasha iyo baahida bulshada.

Xidhitaanada Fasaxa Federaalka

Xarumaha Kasoo-kabashada Musiibada ee Vermont ayaa la xidhi doonaa Isniin, Oktoobar 14 ee Xuska Maalinta Dadka Asalka/Dhaladka ah iyo Maalinta Columbus. Waxay **dib u furmi doonaan Salaasa, Oktoobar 15** oo furnaan doonta saacadaha caadiga ah.

1. Dadka reer Vermont ee ay saameeyeen labadaba ee duufaanada July ayaa booqan kara Xarunta Kasoo-kabashada si ay taageero qof-ka-qof ah uga helaan FEMA iyo Maamulka Ganacsiyada Yar-yar ee Maraykanka. Si aad u hesho cusboonaysiintii-ugu-danbeyssa ee goobaha iyo saacadaha, booqo



FEMA

Page 1 of 2

fema.gov/drc.

2. Waxa sidoo kale jira **sadex wado oo kale** si aad u codsato kuwaasoon u baahneen xarun booqashada:

- Gal khadka tooska ah DisasterAssistance.gov.
- Ka wac khadka caawinta **FEMA 800-621-3362**.
- Soo-deji [FEMA Mobile App-ka](#).



FEMA

Page 2 of 2